



# Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah – Foomka Ogolaanshaha Waalidiinta (CFMD141)

**Magaca Dugsiga:****Taariikhda foomka la bixiyey:****Foomkan waxaa iska leh ardayda sannadaha:****Fadlan soo-celi:**

Foomkan wuxuu waalidiinta siinayaa fursadda inay soo sheegaan inay doonayaan ama aysan doonayn inay ilmahooda/carruurtooda ku qoraan Waxbarashada Diineed ee Gaarka ah (Special Religious Instruction (SRI)). Isla markii la soo cesho foomamka oo la qiimeeyo ayaa maamulaha dugsigu go'aamin doonaa in SRI lagu dhigi doono dugsiga iyo in kale.

**Dugsiga waxaa la soo xiriirey folanteerada Waxbarashada Diineed ee Gaarka ah oo ku bixin doona SRI diimaha soo socda:**

Diinta	Haya'dda/Bixiyaha	Macluumaad dheeraad ah (magaca folanteerka, diinta uu haysto/kaniisadda ka masuulka ah)	Daqiqada/ saacadaha Asbuucii, labadii- asbuuc/bishii	Muddada Barnaamijka (tusaale, hal bil, teeramka 2aad ama hal sano)	Ujrooyinka Ugu-badan oo la filayo

Haddii faahfaahinta folanteerada shaqsiga ah (sida magacooda, bixiyaha aqoonsan iyo haya'dda diineed) aan la hayn waqtiga foomkan la bixinayo, waxaa la siin doonaa waalidiinta ka-hor bilowga barnaamijka oo loogu sheegi doono wargeyska dugsiga, ama macluumaadka laga soo qaadi karo qabilaladda ama sidii kale oo habboon oo uu dugsigu sheego. Markii ay helaan macluumaadkaas, waalidiintu waxay awoodi doonaan inay kala noqdaan ilmahooda/carruurtooda SRI haddii ay doonayaan. Waalidiintu way kala noqon karaan ilmahooda/carruurtooda SRI waqtii kasta ayagoo si qoraal ah ku soo ogaysiinaya maamulaha dugsiga.

**Waxaan caddaynayaa** inaan aqriyey oo fahmey Macluumadka Ogolaanshaha  
Waalidka oo ku saabsan SRI oo ku taal bogga 2aad.

(fadlan sax ku dhig)

**Ma u ogoshahay** in ilmahaaga/carruruada inay ka qaybgalaan SRI haddii lagu dhigayo dugsiga?

HAA

(fadlan hal mid sax ku

MAYA

dhig)

Haddii aad muujisay Haa, fadlan qor faahfaahinta ilmahaaga/carruruada:

Magaca Qoyska Ardayga	Magaca kowaad ee Ardayga	Heer Sanadeedka	Midkeet Diinta kor lagu sheegay ayaa ka-qaybgalka SRI loo ogolaaday?

**Waan fahamsanahay** inay jiri doonto ujrad la xiriirta gadashada waxyalahu ilmahaygu ku isticmaali doono SRI, taasna la qaadi doono isla markii la go'aansho in SRI lagu dhigi doono dugsiga.

(fadlan sax ku dhig)

**Magaca Waalidka/Weliga:** .....

**Cinwaanka:** .....

**Saxiixa:** .....

**Taariikhda:** ...../...../.....

Haddii aad doonayo in ilmahaaga/carruruada inay ka qaybgalaan SRI, sax ku dhig haa markaasna fadlan soo celi foomkan taariikhda kor lagu sheegay. Fadlan ogsoonow haddii haddii aadan soo celin foomka waxaad muujinaysaa inaadan u ogolayn inay ilmahaaga/carruruada ka qaybgalaan SRI haddii lagu dhigayo dugsiga.

Wsaaradda Waxbarashada iyo Tarbiyadda Carrurnimada Hore Qorshaha Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah waxaa laga heli karaa

<http://www.education.vic.gov.au/school/principals/spag/curriculum/pages/religious.aspx>

## Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah – Macluumaadka Ogolaanshaha Waalidiinta

Bixinta Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah, oo kaniisadaha iyo kooxaha diimaha kale, ku bixinayaan dugsiyada dowladda kaas oo lagu idmay qaybta 2.2.11 ee *Sharciga Dib-u-eegidda Waxbarashada iyo Tababarka ee 2006*.

### Qorshaha Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah

SRI waxa keliya oo la dhigi karraa ama la bixin karraa ayadoo la raacayo qorshahaWasaaradda iyo Wareegta Wasiirka MD141. SRI waxaa la dhigi karraa markii baraha diinta folanteerka ah oo la aqoonsan yahay ama la ogolaaday uu dugsiga la soo xiriyo iyo markii dugsigu haysto hantidii uu ku dhaqan-gelin lahaa shuruudaha shariyeed iyo inuu hubiyo in shuruucda waajibka daryeekla loo fuliyey ardayda oo dhan intay dhiganayaan SRI. SRI waxaa la bixin karraa waxaan ka badnay celceliska 30 daqiqo asbuuciiba.

Dugsiyadu waxay waalidiinta siinayaan foomkan haddii uu la soo xiriyo foolanteerka SRI oo la-aqoonsan yahay ama la-ogolaaday. Isla markii foomkan la siiyo waalidiinta markaasna la soo celiyo, maamulaha wuxuu go'aamin doonaa bal inay jiraan hantiyo ku filan si loo awoodo in SRI lagu bixiyo dugsiga.

**MD141 iyo qorshaha waxaa laga heli karraa intarneedka ah** <http://www.education.vic.gov.au/about/department/legislation/Pages/sri.aspx>  
<http://www.education.vic.gov.au/school/principals/spag/curriculum/pages/religious.aspx>

### Waa Maxay Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah?

SRI waa tilmaamo ku jira caqiidooyin iyo mabaadi' diimeed oo gaar ah oo diin leedahay, waana inaan lagu qaldin Wabarashada Diimeed ee Guud (GRE). GRE waa waxbarasho ku saabsan diimaha (taas oo ay ku jiri karaan ama aysan ku jiri karin adeegsiga wakilo caqiidooyin gaar ah si ay u sharxaan shaqooyinka iyo qaabka caqiida ee diintooda), halkas oo barnaamijyada SRI ay yihiin tilmaamo ku jira diin gaar ah waxaana ku jiri kara daraasado ruuxi ah, iyo tilmaamo sida loo noolaado ama loo dhaqmo ayadoo la raacayo mabaadi' da caqiidadaas gaarka ah.

SRI ma bixiso dulmarid caqiidooyinka iyo diimha oo dhan. Waxqabadka SRI kasta oo gaar ah waa tilmaamo hal caqiido keliya, oo ay bixinayaan kaniisad ama kooxaha diimaha kale. Ayadoo la eegayo dabiicadda diimeed ee barnaamijkan, Wasaaradda Waxbarashada iyo Tarbiyadda Carruurnimada Hore kama masuul ah waxyaalaha ku jira barnaamijkaas loo adeegsado inay ku bixiyaan bareyaasha folanteeriga ah oo la aqoonsan yahay.

### Kumaa bixiya Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah?

Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah waxay dugsiyadu ka heli karaan ayadoo dhowr caqido ah oo ay ka midka yihiin diimaha Kirishtaanka, Kaatooliga, Kirishtaanka Ortoodhiska, yuhuudda, Buudaha, Hindiga, Islaamka, Baha'i'ga iyo Siikha. Diimaha ay dugsiyadu heli karaan way kala duwan yihiin ayadoo ku xiran bal in bareyaashu yimaadaan dugsiga. Hadda bixiyayaasha aqoonsada folanteerada Bareyaasha Diimeed ee Gaarka ah waa:

Diinta	Wakiilka/Bixiyaha	Bixiyaha website-ka ee macluumaadka dheeraadka ah	Bixiyaha Lambarka Taleefanka
Kirishtaanka	Wasiirada ACCESS	<a href="http://www.accessministries.org.au/">http://www.accessministries.org.au/</a>	1800 063 341
Kaatooliga	Xafiska Waxbarashada Kaatooliga ah	<a href="http://www.ceomelb.catholic.edu.au/">http://www.ceomelb.catholic.edu.au/</a>	9267 0228
Islaamka	Arka Toledo/Islamic Council of Victoria	<a href="http://arkan.org.au/">http://arkan.org.au/</a>	1300 857 797
Yahuudda	United Jewish Education Board	<a href="http://www.ujeb.org.au/">http://www.ujeb.org.au/</a>	9038 5028
Buudaha	Religions for Peace Australia (RfP)	<a href="http://religionsforpeaceaustralia.org.au/">http://religionsforpeaceaustralia.org.au/</a>	
Kirishtaanka Ortoodhakiska			
Caqiida Baha'i'ga			
Siikha			
Hindiga			

Bareyaasha folanteerada ah waxay ku xiran yihiin kaniisadaha ama haya'do diimeed. Kaalintoodu maahan sida tan bareyaasha. Si ay u helaan aqoonsi, waa inay tababar ku qaataan mid ka mid ah bixiyayaasha kor ku liis-garaysan, waana inay saxiixaan koodhka asluubta kaas oo qoraya sida ay ugu dhex dhaqmayaan dugsiga dowladda. Waa shardiga aqoonsiga in folanteeradu haystaan laysan sax ah ee Hubinta La-Shaqaynta Carrurta (Working With Children Check).

### Ka-qaybgalka Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah

Ka-qaybgalka Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah waa ikhtiyaar. Dugsiyadu carruurta kuma qori karaan SRI ilaa inta la helayo ogolaansho waalid oo ah in ilmahu ka qaybgali karo (ikhtiyaar). Waxyaalaha SRI waxaa laga heli karaa intarneedka iyo wakiilka bixinaya SRI si waalidiintu u eegaan.

Waalidiinta waxaa laga codsanayaan inay soo buuxiyaan foomka una soo celiyan dugsiga haddii ay doonayaan in ilmahoodu ka qaybgalo SRI, haddii lagu bixinayo dugsiga. Haddii aan foomkan la soo celin, ilmahu kama qaybgalayo SRI, marka la bixinayo. Ardayda aan ka qaybgalayn waxaa lagu mashquulin doonaa nashaadyo waxbarasho ahaan u qiimo badan kuwaas oo ka baxsan manhajka asalka laguna siinyayo fasal gaar ah ama meesha ay wax ku baranayaan ardayda ka qaybgalaysa SRI.

**Waad ka saari kartaa ilmahaaga/carrurtaada Tilmaamaha Diimeed ee Gaarka ah waqtii kasta adigoo si qoraal ah ku soo ogaysiinaya maamulaha dugsiga.**

### Macluumaad dheeraad ah

MD141 iyo qorshaha Wasaaradda waxaa laga heli karaa <http://www.education.vic.gov.au/about/department/legislation/Pages/sri.aspx>  
<http://www.education.vic.gov.au/school/principals/spag/curriculum/pages/religious.aspx>